Institute for Diplomacy and Global Affairs

MACHADKA DIBLOOMAASIYADA IYO ARRIMAHA CAALAMKA EE MAAN

Taxanaha Rooble Timir ee Arrimaha Amniga Qaranka (AAQ)
Jamhuuriyada Somaliland

# Khatarta Amni ee ka Dhalan Doonta Isticmaalka Khaldan ee Dawooyinka ee Dhalinyaradda Jamhuuriyada Somaliland!

AAQ #001 | 1 October, 2024

Qalinkii: CABDISHAKUUR Xasan-kayd[1]

## GUUDMAR

Taxanahan oo aan ugu magac darnay Mujaahid Rooble Timir Cali,[2] waxa uu noqon doonaa mid aan si joogto ah ugu falanqeyn doono arrimaha saameynta ku yeelan kara Amniga Qaranka Jamhuuriyada Somaliland, taas oo aan si faahfaahsan ugu iftiimin doono khataraha amni, saameynta ay keeni karaan, meelaha ay saameynta ku yeelan karaan, iyo soo jeedin xalalka iyo qodabada lagaga hortagi karo khataraas si ay hay'adaha ay khuseyso ugu noqon karto sahay ay ku weelayn karaan shaqooyinka muhiim ka ah ee ay u hayaan Bulshadooda.

Qormadan koowaad ee Taxanaha Rooble Timir waxa aan ku iftiimin doonaa 'Khatarta Amni ee ka dhalan doonta hadii aan wax laga qaban si khaldan u isticmaalka dawooyinka ee da'a yarta jamhuuriyada Somaliland. Arrintan oo aan bulshada badidoodu dhaadanayn ayaan u kuurgalnay ku raadjoogista xog sugan oo ah noocyada dawooyinka, kooxaha isticmaala, meelaha laga keeno, gaadiidka qaada, kharashka lagu bixiyo iibsigooda, dareewalada gaadiidka qaada lacagta la siiyo, iyo diiwaangelinta dhibanayaasha dawooyinkaasi adeegsada oo iyaga laftoodu u baahnaan doona xarumo dhaqan celin iyo daweyn si jidhkooda looga nadiifiyo laguna soo dabaalo noloshii caadiga ahayd lagana samato bixiyo mugdiga ay noloshooda galiyeen inta aan siyaabo halis ah loogu isticmaalin dalkooda iyo dadkooda.

## 1. HORDHAC

Sanadihii u dambeeyey waxa aad isu soo tarayay isticmaalka dhalinyartu ay u isticmaalayso dawooyinka sidii maandooriye oo kale ama dareenka ay ugu yeedhaan "in la Xayaaddo" micnaha oo aan ka bedin waynay in ay kasoo dheegeen ereygii Afka Carabiga ku ahaa Nolol. Dhalinyar door ah oo aan weydiinay waxa ay uga jeedaan in la xayaaddo! ayaan haba yaraatee na siinin micnaha kaliya in ay tahay erey suuqi loo adeegsado marka laga hadlayo balwadaha iyo kulamada dhalinyarada oo u dhigmi karta "Waqtigaaga qaado, oo cirka gal".

Arrintan ayaa hadaba leh khatar weyn oo Amniga Qaranka Jamhuuriyada Somaliland hadii aan laga hawlgalin samato-bixinta inta aafowday iyo ka bedbaadinta inta aanay wali asiibin. Isticmaalka maadooyinka caafimaad ee sida khaldan loo isticmaalayo ayaan ku koobnayn dhalinyarta Somaliland oo kaliya laakiin waxa la qaba dalal kale, in kasta oo haya'daha amniga ee dalalkaasi ay sameeyaan dedaalo lagu xakamaynayo dawooyinka laakiin Somaliland aanay lahayn ilaalinta nooca, tayada, tirade iyo iibsiga dawooyinka toona. Cidii doonta ayaa soo iibsan karto oo dalka soo gelin karta, cidii doontana waa laga iibin karaa. Tani waxay kor u qaadaysaa heerka khatarta amni hadaan si haboon loo maamulin.

Dal na ma noqon karo meel cid kasta oo muwaadiniintiisa ama ajaanibkuba ay yeeli karaan sida ay doonaan. Iyada oo la ilaalinayo xuquuqda aasaasiga ah ee qofka, waxaa muhiim ah in qofka laftiisana laga ilaaliyo dadka kale in uu aafeeyo, iyo hadiiba uu khatar ku yahay naftiisa in laga bedbaadiyo iyada oo loo marayo diyaarinta xeerar iyo siyaasad cad oo lagu hagayo sugida Amniga Qaranka.

Isticmaalka madooyinkan caafimaad ee sida guracan loo isticmaalayo ayaan waxa ay soo taxnayn mudo iyada oo heerar kala duwan soo martay. Waxaan qodobeyn doonaa arrimahan hoos ku qoran oo ka qayb qaadatay kor u kaca aafadan:

- Isticmaalka xashiishadu waxa uu ahaa mid mudo soo jiray, in kasta oo dadka isticmaalaa aanay aad u badnayn. Sanadihii 2011-2015 waxa aad u kordhay ka ganacsiga iyo adeegsiga dhalinyarada ee maandooriyahan.[3] Waxa abuurmay shabakado isku xidhan oo keenista, qaadista shixnadaha, qaybinta, iyo baraha kulankooda ah. Waxaa xusid mudan in ay dhexgashay isticmaalka iyo iibkaani qaybo ka mid ah hay'adaha amaanka ee ka hortagi lahaa.

- Isticmaalka Shiishada ayaa iyana noqotay qaab nololeed dhalinyartu waqtiga ku qaataan in kastoo Somaliland aanay lahayn goobo furan sida dalalka deriska iyo dunida kaleba. Shiishada ayaa dhalinyartu u aragtay ilbaxnimo inkastoo badi aanay dareemi karin marka lagu daro xashiishada oo meelo badan oo lagu cabo shiishada ka ah dhaqan, qofka aan garanayna u horseeda qabatin meeshaas uun in uu shiishada u doonto.

- Caabuqii COVID-19 ka dib wax meesha ka baxay goobihii shishada iyo kulamadii blusheed, waxaase soo kordhay aalado cusub oo la qiijiyo oo la yidhaa vape, oo qaarkood yihiin walaxo sida telefoonka gacanta loo dabeeyo. Aaladahan oo shirkadaha sameeya iyo maadooyinka ku jira toona aan la eegin ayaa dalka u yimaada

ganacsi xawli ku socda. Dhalinyar badan oo aan shishada cabi jirin ayaa ay dhiirigalisay, kuwo kale oo shiishada cabi jirayna waxay aamineen in shaqadii iyo hawshii ay tani ka fududahay. Walow khatarta caafimaad aanay ahayn mid ay wax iska weydiiyaan ama isku dayaan in ay ogaadaan.

- Sidoo kale Caabuqii COVID-19 ka dib waxa dhalinyarta dalal badan oo Yurub ah ay bilaabeen isticmaalka Gaasta farxada (Nitrous Oxide) in ay ku cabaan biililaha (Baloon) taas oo usoo gudubtay dhalinyarta Jamhuuriyada Somaliland.

- Waxa looga sii gudbay isticmaal dawooyin kala duwan in hal mar la wada qaato si loo gaadho doorsoon heer sare ah dawooyinkaas oo ay ka mid yihiin Codine (Sharoobo xanuun baabiye ah loona adeegsado la tacaalista Qufaca); Taramadole (xanuun baabiiye iyo xumadjebiye sare); Lyrica (waxa loo isticmaalaa walbahaarka, suuxdinta); Pegblin (waxa loo isticmaalaa walbahaarka, suuxdinta); Promethazine (waxa loo isticmaalaa hurdo la,aanta iyo xasaasiyada); Lorazepam (waxa loo isticmaalaa suuxdinta); iyo Benzodiazepines (waxa lagu dabiibaa xanuunada walwalka, Hurdo laanta, khamri joojinta, walbahaarka, cabsida).

Arrimahaa aan kor kusoo xusnay oo isa saameynaya ama midiba mida kale si toos ah ama si dadban ay xidhiidh ula leedahay ayaynu eegi doonoo bal sida ay u sababi karaan khataro amni, hadaan wax laga qaban, taas oo wax ka qabad la'aanteedu ay dhalin doonto dhibaatooyin caafimaad, dhaqaale, maskaxeed iyo amnio o soo food saarta mustaqbalka Jamhuuriyada Somaliland.

## 2. NOOCYADA DAWOOYINKA SIDA KHALDAN AY U ISTICMAALAAN DHALINYARADU

Waqtiga dhalinyaronimo waa waqtiga uu qofku ugu tamarta badan yahay, isla markaana uu jecelyahay in uu wax kasta ka war keeno, waa waqti cabsidu aad ugu yar tahay, inta badana aan la isweydiin saameynta ka dhalan karta ficil. Dhalinyaradu waa awood hadaan la hagin oo aan lagu tabcin noqon karta mid loo adeegsado tamartooda in ay nafahooda iyo bulshadooda ku halaagaan.

Marka la dhexgaliyo badweynta balwadaha iyo maandooriyaayashana waxa ay u nuglaadaan in si fudud loo adeegsan karo, loogana dhigan karo qalab lagu gaadho ujeedooyin cid gaar ahi leedahay. Ilaalinta danaha qaran leeyahay ayaa mararka qaar gali karta in la sakhraamiyo ama badweynta balwadaha uu muquursiiyo da'ayarta dalalka kale ee uu u arko inay halis ku yihiin danihiisa. Xaaladan qormadani khuseyso kama madhna ku lug lahaanshada arintan laakiin waxa aynu u dhigaynaa qormo kale iyo madal kale oo aan kula tacaalayno arrimahaa.


Waxaa aynu si kooban oo guud mar ah u eegaynaa maadooyinka ugu iticmaalka badan iyo cida isticmaasha, sida ay ku helaan, meelaha laga helo. Magacyada dadka iyo goobaha iyo gaadiidka qaada waxa aanu la wadaagi doonaa hay'adaha anmiga ay khuseyso marka ay timaado in loo qalab qaatay wax ka qabashada arrintan khatarta amni ee aan la dhayalsan karin leh.

### 2.1. Kiniinada Hurdada (Benzodiazepines)

Isticmaalka dawooyinkan ayaa leh la qabsi aad u awood badan oo qofku aanu awoodi karin in uu joojiyo hadii aanu helin dhaqancelin iyo in jidhkiisa/jidhkeeda laga nadiifiyo. waxaase jira shabakado dhalinyaro ah oo u badan dad shaqeysta ama ganacsiyo leh oo u isticmaala sidii xashiishka halista badan ee kookeenynta (Cocaine). Da'ayartan oo u badan hablo ganacsiyo leh, kuwo ay dhaleen waalid hayntoodu wacan tahay, iyo qoysas caan ah ayaa ay dhici kartaa in ay yihiin kuwo la bar tilmaameedsaday, in kasta oo ay u baahan tahay baadhitaan iyo dabagal dheeri ah oo ay sameeyaan hay'adaha amnigu, taas oo aan ku garabsiin doono dhismaha, tababarka, iyo diyaarinta hagayaasha unuga la dagaalanka mukhadaarka, maan dooriyaaysha, badeecada aan asalka ahayn, iyo arrimaha la halmaala.

*Tilmaan-* Benzodiazepines waa qabiilka dawooyinka ee loo isticmaalo hurdada ama loo qoro dadka xanuun dartii hurdadu ku yaraato si ay u helaan hurdo.

*Isticmaalka Dhawaanahan:* Mudooyinkan dambe waxa isa soo taraya dhalinyarta dawadan u isticmaalaysa si ka duwan sidii loogu talogalay. Waxa la samaynayaa in kiniinkii budo laga dhigo, ka dib qalab loogu talogalay in lagu dhalaaliyo oo la mid ah kuwan hoos idiinka muuqda ah ayaa loo isticmaalayaa ka dib sidii shiishada ayaa loo qiijinayaa.




Waxaa Iyana xanuunkeeda leh in kartoonka yar ee ay ku jiraan 12 xabo laga soo siiyo si sharciga baal marsan $100 taas oo aany ku jirin kharashka uu kusoo gaadhayo. Dawadan ayaa laga soo iibiyaa meelo ka mid ah dalalka deriska ah, taas oo shabakad ganacsi oo qaadista iyo gaadhsiinta isticmaalaha ay jirto. Su'aasha ayaa ah sababta cid awooda dhaqaale leh loo bartilmaameedsaday ama loo galiyey in ay tahay ujeedo ogaalkeeda u baahan.







*Saameynta*: Benzodiazepines waxaa ka mid ah dawooyinka daroogo ahaanta loo adeegsan karo sida diazepam, nitrazepam, temazepam iyo alprazolam. Waxay keentaa xanuun aad u daran in uu qabto dadka adeegsada taas oo ka jaba marka ay isticmaalaan. La qabsigan ayaa suuq xawli ah u noqday dawooyin (Benzodiazepines) been abuur ah maadaama baahida dadka qabatimay aad u sareyso, qiimaha ay ku bixin karaana aad u wacan yahay. Waxaase la gudboon qofka badweyntan madow galay iyaga oo aan hubsan ama ka fiirsan in ay raadsadaan talo dhakhtar iyo dabiil jidhkooda lagaga saarayo, waxaad qarsataa waa ku qarsadaa.

Waxyaalaha ay keento waxaa ka mid ah gariir badan xiliga qofku u baahan yahay, walbahaar, hurdo la'aan, cabsi badan oo keeni karta in qofku ku fekero in uu nafta iska qaado, faalig iyo wadne xanuun. Waxay si gaar ah halistoodu u sii badan tahay marka isticmaalkooda la isku daro daroogooyinka kale ee la qoray ama kuwa aan sharci ahayn sida pregabalin, Tramadol iyo kuwo kale.

### 2.2. Gaasta Talaagadaha iyo Qaboojiyeyaasha (R22 Gas)




*Tilmaan*: Neeftan waxa loogu talagalay in lagu shubo talaagadaha iyo qaboojiyayaasha kale, waa maadada marka ay la falgasho tamarta dabka keenaysa qabowda.

*Isticmaalka Dhawaanahan*: Dhalinyada ayaa u isticmaalaysa maandooriye ahaan, iyaga oo aaminsan in farxada dheeri ah ay keento. Waxa ay neefta lagu cabeynayaa Biibiile (Baloon) ka dib ayaa la nuugayaa.

*Saameynta*: waxyaalaha ay keento waxaa ka mid ah dhaawac maskaxda ah hadii qofku marka uu isticmaalo aanu helin ogsajiin ku filan, taasoo gayaysin karta qofka in uu xusuustiisa qaybo ka lumaan. Sidoo kale waxay keentaa wadne xanuun, faalig (stroke) kusoo boodo ah; dareenka urta ee qofka oo ay khalkhalgaliso, iyo saameyno kale oo caafimaad oo maskaxeed sida in qofka ay waxyaalo aan jirin isu sawiraan ama uu baqo badan dareemo ( sychosis or hallucinations). Waxa kale oo ka mid saameynta ay keeni karto caadifada qofka oo aan fadhiyin ama aan la saadaalin karin iyo dagaal ama gacan ka hadal in uu qofku yeesho.

### 2.3. Sharoobadda Qufaca (Codeine)

*Tilmaan*: Codeine[4] waa nooc dawooyinka xanuun baaiyaasha ka mid ah waxaana loo adeegsadaa in lagu daaweeyo xanuun fudud, kuwa dhexdhexaad ah, amaba kuwa aad ka u daran iyo in bukaanka laga caawiyo yareynta qufaca. Codeine waxaa loo heli karaa iyada oo hal kiniin ah, ama iyada oo ku jirta dawooyin kale sida sharoobooyinka lagu daweeyo qabowga iyo caabuqyada xiliga ka dhasha.

*Isticmaalka Dhawaanahan:* mudooyinkan dambe dhalinyarada ayaa u adeegsanaya maandooriye ahaan. Kuma koobna dhalinyarada Jamhuuriyada Somaliland oo kaliya, waxaase warbixino badan sheegeen in ay aad u adeegsadaan ururada argagixisada, iyo kooxaha budhcadnimada iyo mukhaadaraadka ka ganacsada. Siyaabaha isticmaalka oo aad u kala duwan ayaynu ka xusaynayaa ta ku badan dhalinyaradeena, sida caadiga ah furkeeda ama malqaacada cuntada lagu cuno mugeed ayaalagu qiyaasaa marka lagu dabiibayo xanuunadii loogu talo galay. Waxa dhalinyaradu samaynaysaa in quraarada hal mar ama laba jeer loo qaybiyo iyada oo lagu darayo cabitaanka soda ah (Coca Cola, Sprite, Apple) ka dib hal mar la cabayo, marka dabeyshu qofka ku dhacdo waxa uu noqonayaa mid indhuhu aad u kala baxaan, baquhu ka tago, hurdo aan u baahan dhowr maalmood marka uu maandooriyeyaadha kale ku daro sida qaad ama khamri.

Argagixisadu waxay u door bidaan, in naftii halogaha ay ka tagayso baqaha iyo damqashada jidheed. Isagoo dhiiga shalakhsanayana uu sii dagaalami karo ilaa uu ka miirdoonsoomo ama dhinto.

*Saameynta*: Iyada oo saameynta caafimaad ee dawo kastaa badan tahay hadii loo adeegsado sifo ka baxsan tii loogu talogalay ama la isticmaalo qadar ka badan kii loogu asteeyey waxa aynu wax yar ka odhan doonaa saameynta ay keento qaar ka mid ah oo ay ku jiraan: Qaleyl badan oo afka ah, xasaasiyad iyo matag, calool istaag daran, dheelalow, madax xanuun joogto ah, dhidid faro badan, korodh ama hoos u dhac garaaca wadnaha ah, araga oo ay saameyso, xanuun badan oo uurkujirta ah, wareega dhiiga oo aad hoos ugu dhaca, neefsashada oo carqaladi ku timaado, xanuunka xiiqda, midhicirada oo gufeysma, welwel, walbahaar, xasilooni la'aan, dareenka qofka oo fadhiisan waaya iyo isbedel joogto ah oo degenaanshihiisa ah, waxyaabo aan jirin oo isu sawira (Hallucinations), lugo gariir ama jilba xanuun, xanuun daran oo laabta ah.





**2.4. Neefta Qosolka (Nitrous Oxide Gas)**

*Tilmaan*: Neefta Qosolka oo sidoo kale loo yaqaano magacyada ay ka midka yihiin Nitro, N2O, NOS, Biiliile (Balloons). Nitrous oxide, ama gaas qosalku waa neef loo isticmaalo dabiibka iyo adeegyada caafimaad ee ilkaha, oo dhakhaatiirta ilkuhu u adeegsadaan in ay dareenka kaga kaxeeyaan ilkaha ay shaqada ka qabanayaan. Neeftani waa mid aan midab lahayn oo aan ur lahayn oo ka kooban laba molecule oo naydarojiin ah iyo hal malakuyuul oo oksijiin ah. Inkastoo aysan ur lahayn hadana dadka qaar ilkahooda loogaga shaqeeyey ayaa dhadhamin kara dhadhamo bireed halka dadka qaarkiina ay ba ula leedahay dhadhamo macaan




*Isticmaalka Dhawaanahan:* Dhalinyarada ayaa u adeegsata Neeftan loogu talogalay suuxinta ama dareen ka kaxaynta qaybta ciridka ama ilkaha ah ee adeega dabiib lagu wado. Waxaa neeftan lagu sii daynayaa biibiile ama balloon gudihii ka dib ayaa loo jiidayaa sida sigaarka ama shiishada loo jiido. Qofku marka uu jiido hawadan ama neeftan waxa ay dareemaan markaba farxad, in uu suuxo ama miir doorsoomo, qosol aan la ilaalin karin, in isku-dubaridnaantaada ama maamulida naftiisu hoos u dhacda, aragiisa oo aan cadaan ahayn ama hadh galo, wareer ama isku buuq, dhidid aad u badan, daal ama tabard aro aad u sareysa.

*Saameynta:* Haddii xaddi badan oo neeftan ah la isticmaalo waxay qofka dhaxal siin kartaa xaalado caafimaad hadii aanu dhakhso oksajiin u helin. Waxyaalaha ay keeni karto waxaa ka mid ah: dhiig kar ama dhiig yaraan, dhicitaan, Wadne xanuun, neef qabatoow dhimasho




sababi kara hadaan daryeel caafimaad lala gaadhin qofka. Sidoo kale isticmaalka neeftan ee mudada dheer ayaa keeni karta saameynta ay ka mid yihiin:  xusuusta oo lunta, fiitamiin ka B12 oo hoos u dhaca kaas oo hadaan lasoo celin uu sababi karo dhaawac ku yimaada neerfayaal ama maskaxda, dhagaha oo dhawaaq ama sanqadho aad ka dhex yeedhaan, dhaqdhaqaaq aan la maamuli karin oo ku yimaada xubnaha jidhka sida lugaha, gacmaha, debnaha iyo xakamayn la'aan muruqyada jidhka, saameynta ilmaha uurka ku jira iyo dhalmada hadii hooyo uur lihi isticmaasho, Nidaamka Difaaca jidhka oo daciifa, Carqaladaynta hab-dhiska taranka, iyo xanuuno ka mid ah  kuwa dhimirka.

### 2.5. Marwada Liqida dawooyinka (Tramadol, Lyrica, Pegblin, Promethazine, and Lorazepam)

*Tilmaan*: Dawooyinkani waa dawooyin loogu talogalay inay daweeyaan xanuuno kala duwan . Codine (Sharoobo xanuun baabiye ah loona adeegsado la tacaalista Qufaca); Taramadole (xanuun baabiiye iyo xumadjebiye sare);  Lyrica (waxa loo isticmaalaa walbahaarka, suuxdinta); Pegblin (waxa loo isticmaalaa walbahaarka, suuxdinta); Promethazine (waxa loo isticmaalaa hurdo la,aanta iyo xasaasiyada); Lorazepam (waxa loo isticmaalaa suuxdinta); iyo Benzodiazepines (waxa lagu dabiibaa xanuunada walwalka, Hurdo laanta, khamri joojinta, walbahaarka, cabsida).
















*Isticmaalka Dhawaanahan*: Dawooyinkan kala duwan oo xanuuno kala diuwan loogu talo galay in lagu dabiibo, ayaa dhalinyaradu ay mar kaliya u wada liqayaan maandooriye ahaan si ay u gaadhaan waxa ay ugu yeedhaan 'XAYAAD'.

*Saameynta*: Dawooyinkan oo mid kastaa sideeda ay u leedahahay saameynteeda ayaa marka la isku daro ama hal mar lawada qaatana yeelanaya saameyn aad uga awood badan tii ay lahaayeen kali kali. Saameynaha aan tilmaami karno waxaa ka mid ah ee ay yeeshee dhalinyarada habkan u qaadata kiniinadan: Hadalka oo kaa kala luma ama waxa aad ka hadlayso oo aan fadhiyin sida qofka sakhraansan oo kale, wareer ama indha madoobaad, dhibaatooyinka awooda dhaqdhaqaaqa, neefsashada oo gaabisa, iyo  hoos u dhac aad ah oo ku yimaada dhiiga (dhiig yaraan).

## 3. DHALINYARADA IYO AMNIGA QARANKA

Mar hadii aan ka soo hadalnay dhalinyarada iyo si khaldan u isticmaalka dawooyinka oo soo kordhaysa iyo saameynta ay ku yeeshaan caafimaadkooda iyo badqabkooda jidheed, maskaxeed iyo caadifadeedba. Waxaa lama dhaafaan noqonaysa in aan iyadana taabano bal doorka ama xidhiidhka ka dhaxeeya dhalinyarada iyo amniga qaranka si ay inoogu cadaan karto khatarta amni ee aan ka digayno ama aan ku baaqayno wax ka qabashadeeda.

### 3.1. Xidhiidhka Dhalinyarada iyo Amniga Qaranka

Arrimahan soo socda ayaa u muhiim ah kobxinta xidhiidhka ka dhaxeeya dhalinyarada iyo amaanka qaranka:

- ***Waxbarashada iyo wacyigalinta*:** Barista dhalinyaradda arrimaha amniga qaranka, oo ay ku jiraan muhiimadda ay leedahay amniga internetka (sida dembiilayaashu ugu adeegsan karaan internetka faldembiyeedadooda), la dagaallanka argagixisada, iyo u diyaargarowga xaaladaha degdegga ah, wuxuu ka caawiyaa inay fahmaan doorkooda ay ku leeyihiin ilaalinta amniga qarankooda. Waxaa taas lagu gaadhi karaa barnaamijyada dugsiyada, aqoon-isweydaarsiyo bulshada, shirkadaha adeegyada internet ka bixia iyo laamaha amniga.

- ***Ka qayb galinta dedaalada Amniga*:** Encouraging youth participation in national security initiatives, such as volunteering for community safety programs or participating in youth cadet programs, can foster a sense of responsibility and awareness. Dhiirigelinta ka-qaybgalka dhallinyarada ee amniga qaranka, sida barnaamijyada mutawadacnimada ama iskaa wax u qabso ee badbaadada bulshada, iyo sameynta barnaamijyada sida Shaqo Qaran ama kuwo la hal maala waxay kobcin karaan dareenka mas'uuliyadda iyo wacyigalinta.

- ***Nabadgalyada Shabakadaha (Cybersecurity)***: Iyada oo la adeegsanayo tiknoolajiyada sii kordhaysa, barista dhalinyarada ku dhaqanka bedqabka internetku waxay yareynaysaa la kulanka khataraha hanjabaadaha, ilaalinta macluumaadka shaqsiga ah iyo la wadaaga xogaha xadgudub hay'adaha amnigu waxay sare u qaadaysaa dedaalada amniga qaranka.

- ***Ka hortaga Xagjirnimada:*** In dhalinyarada lagala qayb galiyo ama ay door wax ku ool ah ku yeeshaan dedaalada lagaga hortagaya argagixisadu waxay kordhinaysaa taageerada ay ka gaysan karaan arrintan ay yihiin kuwa ugu nugul inay saameyso. Dugsiyada waxbarashada iyo ururada bulshada waxey ka ciyaari karaan door ay ku ogaanayaan dhalinyarada u nugul, kuwa halista ku jira, sidoo kale waxay bixin karaan adeegyada la-talinta iyo wax ka qabashada.

- ***Kobcinta Masuuliyada Wadaninimo:*** Barista dhallinyarada waajibaadka qaran ee saaran iyo muhiimadda ay leedahay in ay ka qayb qaataan nabadgelyada iyo amniga bulshadooda waxay gacan ka geysaneysaa dhisidda dhaqanka wacyi gelinta iyo mas'uuliyadda amniga.

Guud ahaan, isku-darka fikradaha amniga qaranka ee waxbarashada iyo ka qaybgalka dhallinyarada waxay caawiyaan dhismaha bulsho xog-ogaal ah, masuuliyad leh, oo ka qayb qaadata sugitaanka amaankeeda iyo bedqabkeeda bulsho.

### 3.2. Qabatinka Daroogooyinka ee dahliyarada iyo Amniga Qaranka

Dhalinyaradu waa tirade ugu badan ee bulshada Somaliland wanaag kasta oo u kordhaa waxa uu guul u yahay qaranka, dhibaatada soo gaadhaana waa dhibaato soo gaadhay dalka. Saameynta amniga ay ku leedahay isticmaalka iyo qabatinka daroogooyinka ee dhalinyarada waxaa ka mid ah:

- ***Saameyn Caafimaadka Bulshada***: Qabatinka dhalinyarada ee daroogooyinku waxay sababi kartaa saameyn balaadhan oo arrimaha caafimaadka bulshada guud ah, taas oo culeys ku keeni karta kheyraadka qaranka iyo saameynta xasilloonida bulshada. Wax ka qabasho wax ku ool ah oo mukhaadaraadka ah ayaa muhiim u ah joogteynta dad caafimaad qaba oo waxtar u leh naftooda iyo qarankoodaba.
- ***Dembiyada iyo Amniga:*** Qabatinka daroogada ayaa horseedi kara in ay kordhaan falalka dembiyada ahi, sida ka ganacsiga daroogada iyo rabshaduhu. Tani waxay keeni kartaa tamar badan iyo kharash badan oo ku baxa hayadaha sharci-ilaalinta, waxayna saameyn ku yeelan kartaa badqabka bulshada. Barnaamijo balaadhan oo wax ku ool ah ee ku wajahan ka hortagga iyo daweynta ayaa yarayn kara khatarahaas.
- ***Xasiloonida Dhaqaalaha:*** Qabatinka daroogadu waxa uu saameyn karaa xasiloonida dhaqaale iyada oo yareynaysa wax soo saarka (dadka ay aafayso oo ka baxaya cududa shaqaalaha) sidoo kalena waxaa kordhaya qarashaadka lagu bixin doono daryeelka caafimaadka. Dhaqaale xasilloon ayaa muhiim u ah amniga qaranka, maadaama uu xasiloonida guud ee bulsho iyo kheyraadkeedu ay si toos ah u taageerayaan tallaabooyinka amniga qaranka.
- ***Isku-duubnida Bulshada:*** Korodhka sare ee qabatinka daroogada ayaa horseedi kara kala qaybsanaan bulsho, taas oo saameynaysa isku-duubnida bulshada iyo kalsoonida ay ku qabaan hay'adaha dawladooda. Amniga qaranku wuxuu ku tiirsan yahay bulsho xooggan, oo isku duuban, oo taageeraysa wanaagga wadajirkeeda.
- ***Ka-hortaga iyo Wacyigalinta:*** Amniga qaranku wuxuu ka faa'iideysan karaa barnaamijyo adag oo ku aadan ka hortagga daroogada iyo barnaamijyada waxbarasho ama wacyigalineed ee loogaga wargelinayo dhalinyarada khataraha isticmaalka maandooriyayaasha, kor u qaadka hab nololeedka caafimaadka qaba, iyo bixinta nidaamyo taageero bixinaya. Barnaamijyadan waxay caawiyaan dhisidda bulsho adkaysiga leh iyo yaraynta khataraha amni ee mustaqbalka.

Wax ka qabashada qabatinka maandooriyeyaasha ee dhalinyarada iyada oo loo marayo ka hortag dhameystiran, daaweyn, iyo barnaamijyo taageero ah ayaa muhiim u ah kobcinta bulsho bedqabta oo xasilloon.

### 3.3. Qabatinka dhalinyarada ee daroogooyinka iyo dalalka cadowga ah

Dal kasta amnigiisa waxaa saameyn ku yeelan kara hadba doorka, awooda, iyo saameynta dalalka cadowga u ah dalkaas ama ay ka dhaxeyso xurgufo siyaasadeed, dhaqaale, bulsho, ama dibloomaasiyadeed. Hadii dalalkaasi ay yihiin kuwo deris dhow la ah ama xuduud ay wadaagaana waxay sii kordhinaysaa doorka iyo saameyna ay ku yeelan karaan. Hadaba qodobadan hoose ayaa ka mid ah xidhiidhka ka dhaxeeya qabatinka daroogooyinka ee dhalinyarada iyo dalalka cadaawada siyaasadeed ama dhaqaale ee dal leeyahay, sidoo kale dalalka derisk aiyo kuso shisheeyo oo arrintan aynu ka hadlayno raad togan iyo mid tabanba ku leh ayaa jiri kara taas oo u baahan fiiro gaar ah iyo dabogal joogto ah.

- ***Waaridista Daroogooyinka iyo Colaadaha:*** Meelaha ay ka jiraan xasaradaha, colaadaha iyo iskahorimaadyada ama xiisadaha ka dhaxeeya dalalka deriska ah ayaa inta badan siiya fursad shabakadaha ka ganacsada maandooriyeyaasha iyo kootarabaanka kaas oo noqdo ganacsi faaido badan leh. Iska-horimaadyadu waxay abuuri karaan deegaan ay si baqasho la'aan ah u maraan ganacsiga daroogada iyo shabakadaha ku foogan taas oo ay ku kobcaan, ayna ka faa'idaystaan xasilooni darro iyo sharci-ilaalin la'aan colaaduhu dhaliyaan.
- **Carqaladeyn Dhaqaale iyo Bulsho:** Xidhiidhka cadaawadeed ama xurgufta ku saleysan dano qaran wuxuu sii xumeyn karaa xasilooni darada dhaqaale iyo kala-geynta bulshada, taas oo ay doorweyn ka qaadan karto hadba heerarka sare ee qabatinka daroogada bulshada dal leeyahay. Aagagga dagaalka iyo gobollada ay ka jiraan colaadahu ayaa badanaa waxaa aad ugu kordha isticmaalka daroogada oo si ujeedeysan loogu baahiyo, arrintan oo sii xumaynaysa kala qaybinta bulshada, sidoo kalena sii kordhinaysa xasilooni darada.
- **U Kala gooshinta daroogooyinka ee Xuduudaha:** deriskaaga cadaawada ama xurguftu idinka dhexaysaa waxaa aad u sareeya suurtogalnimada inay ku lug lahaadaan ka ganacsiga iyo daroogooyinka xuduudka ka soo galaya, iyaga oo xurgufta ama khilaafka idinka dhexeeya u adeegsanaya sabab ay ku fududeeyaan ama garab u siiyaan ka ganacsiga sharci darada ah ee daroogooyinka. Arrintan oo abuuri karta sakhraamin iyo aafeyn bulsheed kordhinaysana qabatinka daroogooyinka si ay u wiiqanto awooda amniga ee dalka iyo khayraadkiisu.
- **Khayraad Weecin/leexin:** Dalalka ay colaaduha la gala deriskooda ama ay xurguf cadaawadeed ka dhaxeyso ayaa inta badan maaliyadii ku bixi lahayd ka hortaga iyo ilaalinta daroogooyinka u weeciya dhanka baahiyaha ciidamada iyo difaaca. Tan, oo dhalin kartaa in la ilduufo oo laga jeedsado xakamaynta iyo la dagaalanka qabatinka daroogooyinka, hadii ay taasi dhacdana keeni karta xili ay noqon karto dhibaato qaran oo dhaqaalaha, amniga, iyo caafimaadkaba ku noqon doonta dhiigbax.
- **Saameynta ay ku keento ciidamada**: Qabatinka daroogada ee shaqaalaha amniga ee goobaha ay dagaaladu ka dhacaan waxay wiiqi kartaa waxtarkooda iyo niyadooda.

Xaqiijinta in ciidamada amniga ay noqdaan kuwo ka fayow daraagooyinka ayaa lagama maarmaan u ah sugitaanka iyo ilaalinta amniga qaranka.

U dhug lahaanshaha arrimahani waxay u baahan yihiin xeelado dhamaystiran oo ay ka mid yihiin xoojinta amniga xuduudaha, kobcinta iskaashiga caalamiga ah ee la dagaalanka ka ganacsiga daroogada, iyo dar-dar gelinta ka hortagga mukhaadaraadka iyo daaweynta si loogu guuleyto xalinta khilaafaadka iyo dedeaalada lagu xasilinayo xasaradaha.

### 3.4. Ku lug lahaanshaha hawlwadeenada hay'adaha sharci fulinta ee ka ganacsiga daroogada iyo amniga qaranka

Anaga oo aan qormadan faraha ku fiiqayn doorka xubno ka mid ah hay'adihii ka hortagi lahaa ku leeyihiin fududeynta waaridka maandooriyayaasha, isticmaalka, ka ganacsiga ama ku garabsiinta kuwo ka ganacsada, qabashada kuwo aan garab heysan iyo mararka qaar ku shaambadeynta in lagu soo qabto maandooriyeyaal kuwo aad haba yaraatee wax raad ah arrintaa ku lahayn laakiin cid ay si kale isu hayaan u adeegsatay hawlwadeeno ka mid ah hayadihii sharci fulinta. Dhacdooyin badan oo qaarkood maxkamadaha ciidamada iyo kuwo rayidkaba tageena waa jiraan, hada se muhiim inooma aha ka daba tagoodu iyo soo gudbinta magacyo, laakiin ujeedka qormadan koowaad ee taxanaha amniga qaranka ee Rooble Timir waa baraarujin bulsheed iyo baaq wax ka qabasho si loo samato bixiyo xooga dihin ee qaranka Somaliland oo ah dhalinyaradiisa.

Marka hayadaha amniga iyo laamaha sharci-fulintu lu lug yeeshaan arrintan waxaa ay keeni doontaa hadii aan wax laga qaban arrimahan hoos ku qoran:

- **Luminta Kalsoonida:** Marka ay saraakiil, askar, iyo hawlwadeeno ka mid ah sharci-fulintii ay ku lug leeyihiin ka ganacsiga daroogada, waxay wiiqeysaa kalsoonida ay dadku ku qabaan hay'adahaas iyo nidaamka cadaaladda. Kalsooni la'aanta ayaa keeni karta hoos u dhac ku yimaada wadashaqeynta lala yeelanayo sharci fulinta waxayna caqabad ku noqonaysaa dadaallada lagula tacaalayo dembiyada la xidhiidha daroogada.

- **Fashilka Hawlgalada:** Musuqmaasuqa ka dhex dilaaca hay'adaha sharci-fulintu wuxuu wax u dhimi karaa baadhitaanada iyo hawlgallada ka dhanka ah shabakadaha ka ganacsiga daroogada. Haddii ay saraakiisha ama askartu ku lug leeyihiin ganacsiga daroogada, waxay keeni karaan inay bixiyaan macluumaadka gudaha ee ka dhanka ah mukhaadaraadka iyo ganacsatada lagu dabo-jiro taas oo qalin daaraysa hawlgaladii lagula tacaalayay somatabixinta, dadaallada ka hortagga daroogada, iyo sugitaanka ambiga qaranka.

- **Kor-U-kaca Ganacsiga Daroogooyinka:** Ka qeyb qaadashada hay'adaha amniga ee ka ganacsiga daroogada waxay fududeyn kartaa qulqulka daroogada, taasoo horseedi karta helitaanka oo fududaada iyo qiimaha oo jabnaada. Waxaa markaa ka dhalanaya kordhka heerarka qabatinka iyo dhibaatooyinka la arrimaha xidhiidha bulshada, taasoo xasillooni darro u horseedi doonta bulshada sidoo kale culeys ku keeni doonta dhaqaalaha iyo kheyraadka dalka.

- **Hoos-u-dhaca Dedaalada Amniga:** Musuqmaasuqa iyo ku lug lahaanshaha ka ganacsiga daroogada ee hawlwadeenada amnigu waxay khalkhal galin kartaa dedaallada lagu sugayo amniga qaranka. Waxay sidoo kale gacan ka geysan kartaa korodhka tirade iyo noocyada dembiyada abaabulan iyo xiisadaha.
- **Saameynta Karaamada shaqada iyo niyada hawlwadeenada amniga:** Ka qaybgalka hawlwadeenada sharci-fulinta ee ka ganacsiga daroogadu wuxuu baabi'in karaa saraakiisha kale waxayna saameyn ku yeelan kartaa hufnaanta guud, karaamada shaqada, iyo waxtarka ay leeyihiin hay'addaha sharci fulintu. Taas oo ugu dambeyn horseedi kartaa caqabado ballaadhan oo dhinaca amniga ah iyo sarreynta sharciga oo hoos u dhacda.

Wax ka qabashada arrimahan waxay u baahan tahay kormeer adag, baaritaameedyo cad oo gudaha hayadaha amaanka ah, iyo tallaabooyin isla xisaabtan oo ay sameeyaan hay'adaha sharci fulinta. Intaas waxaa dheer, kobcinta daah-furnaanta, iyo ciidamada oo lagu tababaro la-dagaalanka musuqmaasuqa, iyo dhiirri-gelinta duufaanta waxay gacan ka geysan kartaa yareynta khataraha la xidhiidha ku lug lahaanshaha qaar ka mid ah hayadihii sharci-fulinta iyo cadaalada ee ku foogaan lahaa ka hortaga iyo ilaalinta ka ganacsiga daroogada.

## 4. GEBOGEBO

***Soo koobid:*** Markaan aragnay xawliga ay ku socoto dhalinyarada galaya badweyntaa khalad u adeegsiga dawooyinka iyo maandooriyaayasha kale, **Machadka MAAN** waxa uu garowsaday in ay lagama maarmaan tahay in aan ku baraarujino bulshada Somaliland, dawlad iyo dadweyne, sheikh iyo shariif, dhalinyaro iyo waayeel, rag iyo duwar, ciroole iyo caruur in aynu joogno waqti aan wax ka qaban karno, oo samotabixin karno aafowday. Wali maynu gaadhin heer ay noqoto masiibo (crises) dadka dhalinyarada dhimirka noqdayna ay ka badnaadaan dhakhtarada inoo diyaarsan, inta ku kacday fal-dambiyeedo halis ahina ay noqoto tiro beel, cadowga Somaliland na hanto muwaadiniin u nugul in si fudud loo adeegsado oo loogu shaqeysto. Waynu awoodnaa in la xakameeyo noocyada dawooyinka ah ee meelo gaar ah uun laga helo karo, sida loo bixinayo iyo awoodihii is-dheeli tiri lahaa iyaga oo kala madax banana ilaalin lahaa bixinta iyo hubinta dawooyinkaa iyo dayadoodaba. Halka inagu seega maanta oo aan ALIF joogno (bilow wax ka qabasho leh), AL-BAQARAH ayuu ina dhibi doonaa iyada oo guri kasta dhibtaasi si toos ah ama si dadban u gali karto. Imisa DHAKHTAR ama SARKAAL dawladeed oo ku hawlan u adeegista bulshadooda ayaan ka warheyn ubadkoodii badweynta ay muquurteen iyo sida ay ugu baahan yihiin samato bixin. Kuma canaanan karto dhalinyaro dhibtaas ku dhacay, hadii aynu ku guuldareysanay in aynu hagi weyno, una diyaarin weyno masuuliyada sugaysa. Ganacsiyeynta adeegyada bulsheed (waxbarasho, caafimaad, diin, ciyaaro) waxay keenayaan dhibaatooyin hadii aynaan u diyaarin shuruuc adag oo ilaalisa. ***WAXA AAN MAANTA QABAN KARNO HADAAN BERI LA SUGNO, BERITO IN AAN AWOODA MAANTA HAYN DOONO LAMA HUBO.***

***Aragtidayada:*** Waxa aanu aaminsanahay in aan joogno xaalad aan wax ka qaban karno arrinta inta aanay saameynteedu sii balaadhan. Waxa aynu haysanaa arrimihii dedaalkaa taageeri lahaa oo inaga caawin lahaa u talaabsiga dhanka guusha.

***Baaq Wax Ka Qabasho:*** Waxaan ugu baaqaynaa bulshada reer Somaliland wax ka qabashada arrintan si aan uga hortagno inay saameyn ku yeelato amniga qarankeena. Si ay taasi inoogu hirgasho waxaan soo jeedinaynaa talaabooyinkan hoos ku qoran in aan qaadno:

- Diyaarinta siyaasad cad iyo istaraatajiyadeedii fulineed ee keenista dawooyinka si khaldan loo isticmaali karo keenistooda, dhowristoodu, iyo hubinta isticmaalkooda in la diyaariyo.
- Kobcinta Waaxaha ka hortaga maandooriyaasha, badeecadaha been abuurka ah, ka ganacsiga aadamaha iyo dambiyada abaabulan ee hay'adaha amniga ee kala duwan, iyo yagleelida xarunta isku duba ridka hawlahooda iyo xog wadaagistooda.
- La socoshada isbedelada noocyada iyo qaababka faldambiyeedada abaabulan, si xiliga hawlgal ka dhan ah loo fulinayo xididada loogu siibi karo jilayaal badan.
- Diyaarinta xeerka u muhiimka ah dardangalinta iyo xoojinta shaqadan xasaasiga ah (ka ganacsiga daroogada sharci darrada ah, iyo dembiyada abaabulan)
- Xoojinta iskaashiga hay'addaha sharci fulinta iyo ciidamada kala duwan ee Somaliland iyo xarumaha adeegyada caafimaad (dawli iyo kuwo gaar loo leeyahay ba)
- Kordhinta iskaashiga Hay'adaha sharci fulinta iyo dugsiyada waxbarashada (dawli iyo kuwo gaar loo leeyahayba)
- Tirakoobka dhalinyarada ay aafeysay si looga hawlgalo samatabixintoodda.
- Diyaarinta ugu yaraan hal ama laba xarumood oo dhaqan celin loogu sameeyo inta loo wado dabiibista jidhkooda lagaga nadiifinayo.
- Barnaamijyo wacyigalin lagu baraarujinayo dhibta ka dhalan karta si bulshadu ugu feejignaato cida hawshan qayb ka ah, sharcigana loo geyn karo cida hawshan amniga saameynta ku yeelan doona ku foogan.

**FIIRO GAAR AH**

[1] ***CABDISHAKUUR Xasan-kayd*** waa aasaasaha iyo gudoomiyaha Machadka Dibloomaasiyada iyo Arrimaha Caalamka ee MAAN. Waana musharax darajada saddexaad ee Jaamacada (PhD) ee Barashada Dibloomaasiyada iyo Xidhiidhka Caalamka (gaar ahaan dhanka Amniga). Waxa uu hore usoo noqday La-taliyaha dhanka Amniga ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga, Jamhuuriyada Somaliland. Sidoo kale waxa uu bare kasoo noqday qaar ka mid ah Jaamacadaha Jamhuuriyada Somaliland mudadii u dhaxeysay 2010-2012.

[2] ***KUMA AYUU AHAA MUJAAHID ROOBLE TIMIR CALI?*** Rooble Timir Cali waxa uu ahaa sarkaal sirdoon oo ka tirsanaa hay'adii Nabad Sugida Soomaaliya, waxa uu ka mid noqday saraakiishii SNM ee halganka hubeysan kaga dhiidhiyey dhibtii, hadimooyinkii iyo xasuuqii ay dawladii Maxamed Siyaad ka gaysatay Somaliland. Hanashadii Guusha SNM iyo dib-u-dhiskii dalka ka dib waxa uu ka mid noqday Saraakiishii lagu Aasaasay ciidanka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland isaga oo noqday Hogaanka Wardoonka ciidanka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland oo uu shaqo wanaagsan ka qabtay. Waxa uu noqday Agaasimihii Lagu Aasaasay Hayada Sirdoonka Qaranka 19 December 1999, taas oo 42 kii hawlwadeen ee lagu bilaabay Hay'adaa uu badi kala yimid Hogaanka wardoonka ciidanka Qaranka ee uu taliyaha ka ahaa.

[3] Sanadkii 2016 ayaan bilaabay xog-ururin ku aadan arritan maandooriyada sii kordhaya si aan xog sugan oo shabakadaha ah aan u helo ka dibna ula wadaago Hay'adaha amniga ee ay khuseyso. Waxa se aan arkay in ay ila galayso cida aan la wadaagi lahaa, shaadhka xiligaa aan siday iyo jooga aan ku duuleyey labadubana aanay ii saamxayn in aan u ban baxo dagaal masuuliyiin iyo waaxo ka mid ah Hay'adaha amniga Jamhuuriyada Somaliland in aan galo. Waxaanan joojiyey xog-ururintaas wallow aan qaybo ka mid ah wareysiyada aan ka qaaday xubno ka mid ahaa muunada cilmi-baadhista.

[4] Magacyada ganacsi ee dawadan waxaa ka mid - scomp, Cheratussin, Cheratussin Dac, Codar Ar, Codar D, Codar Gf, Codeine Contin, Covan, Damylin With Codeine, Fioricet With Codeine, Histex Ac, Linctus Codeine Blanc, M-clear Wc, M-end PE, Mar-cof BP, Mar-cof Cg, Mersyndol, Ninjacof Xg, Pseudodine C, Robaxacet-8, Robaxisal, Triacin-C, Trianal C, Triatec, Triatec-30, Triatec-8, Tusnel C, Tuxarin, Tuzistra, Tylenol With Codeine.

## AKHRIS DHEERI AH


Isabella Backman (8 January 2024) Nitrous Oxide Effects Are Reversible With Early Treatment. https://medicine.yale.edu/news-article/nitrous-oxide-effects-are-reversible-with-early-treatment/

How Does Nitrous Oxide Work? https://smilingkidsnoblesville.com/how-does-nitrous-oxide-work/

Catherine Schuster-Bruce (Mar 18, 2023) A man woke up unable to walk. It turned out vitamin B12 was inactivated in his body after he took laughing gas. Business Insider https://www.businessinsider.com/nitrous-oxide-use-laughing-gas-effects-drug-high-paralyzed-2023-1?r=US&IR=T

Nikos Evangelou and Rasha Abdel Fahim (September 7, 2022) Nitrous oxide: neurologists report a worrying rise in young people with paralysis. The Conversation. https://theconversation.com/nitrous-oxide-neurologists-report-a-worrying-rise-in-young-people-with-paralysis-189722

Antonia O'flaherty (12 May 2024) Nitrous oxide can cause paralysis and death. We got it delivered to our door in under an hour. ABC News. https://www.abc.net.au/news/2024-05-12/australia-nang-delivery-nitrous-oxide-health-effects/103694130

Yasmin Rufo (8 November 2023) Nitrous oxide: 'Daily use of laughing gas left me in a wheelchair'. BBC. https://www.bbc.com/news/uk-england-london-67355097

Medically reviewed by Alan Carter, Pharm.D. — Written by Valencia Higuera (August 28, 2018) Potential Side Effects of Nitrous Oxide. Healthline. https://www.healthline.com/health/nitrous-oxide-side-effects

Jamie Eske (14 February 2023) What are the effects of drug misuse? Medical News Today. https://www.medicalnewstoday.com/articles/effects-of-drug-abuse


MAAN
Institute for Diplomacy and Global Affairs


**Machadka Dibloomaasiyada iyo Arrimaha Caalamka ee MAAN**

Waddada Muj. Abdilahai Askar,
Koonfur-Galbeed,Maansoor Hotel,
Ibrahim Koodbuur, Hargeisa, Somaliland

+252 634-888-444

Kayd@maan-institute.com

www.maan-institute.com